





Askarkii Roomaanku intaas dabeed waxa ay shaabbadeeyeen dhagaxii oo xabaashiina ilaalo ayay u direen. Imika cidina ma gali karto cidina kama bixi karto.

19



Haddii tani ay ahaan lahayd dhammaadka sheekada, murugo intee le'eg ayay yeelan lahayd. Laakiinse Ilaah waxa uu sameeyay wax cajiib leh. Ciise dhimashada kumuu sii jirin!


20



Salaaddii hore ee subaxnimadii maalinta ugu horreysay toddobaadka, kuwo ka mida xertii Ciise ayaa arkay iyadoo xabaasha laga qaaday dhagaxii ku daboolnaa. Markii ay gudaha xabaasha

eegenna, Ciise maydkiiu muu oollin meesha.

21



Haweenay ayaa sii joogtay iyadoo xabaasha ka dul ooyaysa. Ciise ayaa dabeetana iyada u muuqday! Waxa ay dib uugu carartay xertii kale si ay uugu sheegto warka farxadda leh. "CIISE UU NOOLYAHAY! CIISE WUU KA

SARAKACAY DHIMASHADA!"

22



Sarakiciiddii

Si dhakhso ah Ciise wuxuu uugu yimid xertii, waxaanu tusay nabarradii gacmihiisa musmaarrada lagaga qodbay. Waxa ay ahayd run. **CIISE WAA UU SOO NOOLAADAY!** Wuxuu Butros ka cafiya inkiritaankiisii uu isaga ku dafiray, waxaanu xertiisa u sheegay inay qofkasta u sheegaan waxyaalaha isaga ku saabsan. Dabeetana wuxuu dib uugu laabtay samada oo ahayd meeshii uu hore uuga yimid Iiddii Masiixiga ee uugu horreysay.


23

Sarakiciiddii
Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah, Kitaabka Quduuska ah,
waxa laga helayaa
Matayos 26-28, Luukos 22-24, Yooxanaa 13-21
"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiya." Sabuurka 119:130

Waxa qoray Edward Hughes
Waxa Tusaaleeyay Janie Forest
Waxa tarjumay Zemendale Translation Service
Waxa dhaqan-geliyay Lyn Doerksen
Qisada 54 ee 60
M1914.org
Bible for Children, PO Box 3, Winnipeg MB R3C 2G1 Canada
Liiisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu ku magacaabo denbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho.
Ilaah si aada ayuu inoo jecelyahay waxaanu soo diray Wiilkiisa, Ciise, si uu ugu dhinto Iskutallaab korkeeda una bixiyo qaanta denbiyadeenna.
Haddaad rabo inaad kasoo laabato xad-gudubyadaada, sidan ku dhex Ilaah: Ilaahaygii weynaayow, waxaan rumaysanahay inuu Ciise u dhintay aniga aawaday isagoo haddana nool. Fadlan ii kaalay oo iga cafi denbiyadayda, si aan imika u helo nolol cusub, oo aan adiga weligaa kuula jiro. Igu caawi inaan adiga awгаа u noolaado anoo ka dhigan ilmahaaga. Aamiin. Yooxanaa 3:16
Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba Ilaah la hadal!

Somali




Gabadh ayaa taagnayd meel taag ah dusheed, indheheeda murugadu ka muuqataana waxa ay daawanayeen muuqaal aad u xun. Waxa dhimanayay wiilkeedii. Hooyadani waxa ay ahayd Maryan, waxaanay taagneyd meel u dhow halkii Ciise loogu qodbayay iskutallaabta korkeeda.

1

Sidee waxyaalahan oo dhammi u dhaceen? Sidee Ciise noloshiisaas quruxda badnaydi uugu dhammaan kartaa sidan foosha xun? Sidee Ilaah wiilkiisa uugu ogolaan karaa in iskutallaabta korkeeda lagu qodbo oo halkaas uugu dhinto? Ciise ma waxa uu qalad ku sameeyay cidda uu ahaa? Ilaah miyuu guul-darraystay?

2




Maya! Ilaah muu guul-darraysan. Ciise muu samaynin wax qalad ah. Ciise marwalba wuxuu oga in isaga ay dili doonaan dad xumaan falayaa ahi. Xitaa markii Ciise uu ahaa inan yar, ni da' weyn oo la yidhaahdo Simecon ayaa Maryan u sheegay murugadaas iman doonta.

3



Maalmo yar ka hor intii Ciise aan la dilin, waxa timid haweenay oo caghiisa ku shubtay cadar iyo udug. Xertii dabeeto waxay yidhaahdeen, "Naagtani way is khasaarinsaa," oo iyada way canaanayeen. Ciise markaa wuxuu yidhi, "Naagtani waxa ay samaysay shaqo wanaagsan, waxay sidan u samaysay aasitaankayga." Waa ereyo cajiib leh!

4




Intaas dabadeed, Yuudas oo ka mid ahaa labo iyo tobankii xerta Ciise ahaa, waxa uu waafaqay inuu Ciise wadaadka sare uugu gacan geliyo qadaadiic 30 ah aawadood.

5



Xilligii Iidda Kormarista, Ciise waxa uu xertiisa la wadaagay cuntadii ugu danbaysay. Wuxuu iyaga u sheegay waxyaalo cajiib leh oo ku saabsan Ilaah iyo ballanqaadyadiisa uu siiyay kuwa isaga jecel. Dabeeto, Ciise wuxuu iyaga siiyay kibis iyo koob ay wadaagaan. Tani waxa ay ahayd inay iyaga xasuusiso in Ciise jidhkiisa iyo dhiigiisa loo bixiyay cafiska denbiyada awgood.

6




Ciise dabadeedna wuxuu xertiisa u sheegay in isaga la gacan gelin doono, oo iyaguna ay baxsan doonaan. Butros wuxuu ku adkaystay oo yidhi, "Anigu ma baxsan doono." Ciise wuxuu isaga ku yidhi, "Inta aan diiggu ciyin ka hor, waxaad I inkiri doontaa saddex jeer."

7



Wakhti danbe oo habeenkaas ah, Ciise wuxuu tegay Beertii Getsamane. Xertiisii isaga la socotayna way hurdeen. Ciise wuxuu ku ducaystay, "Aabbow, koobkan iga fagee, hase ahaatee, doonistaydu yaanay noqon, taaduse ha noqoto."

8



Si kedis ah waxa beertii kusoo galay col uu horkacayo Yuudas. Ciise ismuu difaacin, laakiin Butros ayaa nin dhegta ka jaray. Ciise dabeeto aayar ayuu taabtay ninka dhegtiisii oo wuu bogsiiyay isaga. Ciise waxa uu ogsoonaa xidhitaankiisu inuu yahay qayb ka mida doonista Ilaah.

9



Dadkii badnaa waxa ay Ciise u kexeeyeen gurigii wadaadka ugu sarreeya. Halkaasna culimadii diinta Yuhuuddu waxa ay ku sheegeen inay waajib tahay inuu Ciise dhinto. Butros waxa uu markaas ka daawanayay meel u dhow dabka addoomada.

10



Halkaasna saddex jeer ayaa dadku ay ku arkeen Butros oo ay ku yidhaahdeen, "Waxa aad la socotay Ciise!" Butrosna saddex jeer ayuu arrintaas inkiray, waxayna noqotay sidii Ciise hore u sii sheegay. Butros xitaa wuu habaartamay oo wuu dhaartay.


11



QUQU-QUUQUUQUU


Waxyar dabadeed, waxa ciyay diigii. Taasi waxa ay Butros uga dhignayd sida codkii Ilaah oo isaga xasuusnaya erayadii Ciise. Butros dabeetana si aada ayuu u ooyay.

12




Yuudas sidoo kale wuu ka xumaaday arrintaas. Wuxuu ogsoonaa in Ciise aanu denbiile ahayn. Yuudas wuxuu 30 qadaadiicda ahaa dib uugu celiyay wadaaddadii, laakiinse waa ay ka diideen inay qaataan.

13



Yuudas wuxuu daadiyay lacagtii, dabeeto wuu baxay oo wuu is dilay.


14



Wadaaddadii waxay Ciise hor keeneen Bilaatos, oo ahaa taliyihii Roomaanka. Bilaatos wuxuu yidhi, "Ninkan wax denbi ah kumaan helin." Laakiin dadkii badnaa waxa ay ku qayliyeen,


"Iskutallaabta ku qodob!
Iskutallaabta ku qodob!"

15




Ugu danbayntii Bilaatos wuu aqbalay, waxaanu xukumay in Ciise ku dhinto iskutallaabta korkeeda. Askartii waa ay dharbaaxeen Ciise, oo wejigay ka candhuufeeeyeen, waxaanay la dhaceen jeedal. Waxa ay sameeyeen taash qodxaan laga sameeyay oo madaxa u geliyeen kuna cadaadiyeen madaxiisa. Dabeetana waxa ay ku musbaareen iskutallaab ka samaysan loox si uu ugu dhinto halkaas.

16



Ciise marwalba wuxuu ogsoonaa inuu sidaas u dhiman doono. Sidoo kale wuxuu ogsoonaa in dhimashadiisu ay cafis u keeni doonto denbiilayaasha isaga isku halleeya. Waxa hareeraha ka xigay oo lala qodbay denbiilayaal. Midkood waxa uu rumaystay Ciise, waxaanu tegay jannada. Kii kale se laakiin muu rumaysanin.

17



Saacado markuu silcayay kadib, Ciise wuxuu yidhi, "Waa dhammaatay," waanu dhintay. Shaqadiisii waa la dhammaystiray.

Waxaana isaga lagu aasay xabaal gaar ah.

18